



## Biyaha Tuubada Ee Minneapolis

Waxaa jira sababo badan oo aad biyaha tuubada uga dooran kartid kuwa caagadaha

Magaalada Minneapolis waxay ku faanlaa biyaheeda la cabo oo aad u wanaagsan. Biyaha tuubada ee Minneapolis waa biyo saxo leh, oon wax khalar ah laheyn, dhadhan leh, raqiisna ah. Waxay ka mid yihiin biyaha wadanka oo dhan ugu fiican, tijaabooyin qarsoodiah oo loo barbar dhigay biyaha caagadaha ku jirey waxay muujiyeen in ay xilaa ka fiican yihiin biyaha lasoo warshadeeyey.

Magaaladeenu waxay leedahay biyo nadiif ah oo kor u dhaafsan ama ku sar go'an heerka gobolka iyo federaalkuba ogooyeen inay ahaadaan. Celclis ahaan 500 oo tijaabo ayaa maalintiiba la qaadaa si laas loo sugo.

Taas waxaa si dheer si ay biyuhu u noqdaan nadiif aan wax khalar ah laheyn, waanu khafiifinaa si aan dadku u iibsanaa qalab sii khafiifiya oo qaaliku ah. Waxaan kaloo ku darnaa falooraydh si ay uga hor iago bololka (suuska) ilkaha.

Dadaaladaas aan sameynay awgood, biyaha mageeladuna waxay kaalinla 10-aad ka galeen biyaha tuubada ee magaaloyinka Mareykanka ee ay ku noolyihiin dad tiradoodu gaareyso 250,000 ama in ka badan sida ay yiraahdeen Kooxda Howlaha Deegaanka, waa ururr u ololeeya arimaha deegaanka oo ku yaala Washington, DC.

Dadka gala biyaha caagadeysan ma oga dhaqaalaha ay badbaadsan karaan haddii ay cabaan biyaha tuubada ee Minneapolis. Qiimaha hal caagad oo 20 oz oo biyo ah oo aad kala soo baxdid mashiinada lagu gado waxay la qiimo lahay adigoo biyaha tuubada ee Minneapolis ka buuxiyey 10 saxanka musqusha ee lagu qubaysto ah.

Biyaha tuubada ee Minneapolis waxay kaloo uturaan deegaanka. Biyaha caagadaha waxa lagu soo warshadeeyaa warshado markaas ka dib ayaa ayaa dadka loo soo raraa. Maraka caagadahaas biyaha laga cabo waa la tuuraa iyagoo keena qashin aan loo baahneyn. Biyaha tuubada ee Minneapolis gurigaaga iyo xafiiskaagaba way kuugujiraan iyagoo caagad iyo warshadeyn toona u baahneyn.

Dadka degan meelaha ka baxsan magaaladan Minneapolis xilaa wey gaaraan biyahayagu. Biyaheena tuubadu waxay gaaraan ganacsiyada iyo dadka degan magaaloyinka Columbia Heights, Crystal, Golden Valley, Hilltop, new hope, iyo Morningside ee Edina. Bloomingtona way gaaraan. Madaarka iyo Jardiina Fort Snelling way helaan biyaheena.

